

Warqadda macluumaadka ee Sharciga Ilaalinta Macluumaadka ee xubnaha Folkhögskoleföreningka Angered

Waxa laga yaabaa in aad maqashay xeerka cusub ee ilaalinta macluumaadka ee The General Data Protection Regulation (GDPR) kaas oo dhaqan galaya 25ka May oo bedeli doona sharciga warbixinta shakhsiga iswiidhan.

Folkhögskoleföreningka Angered wuxuu ula macaamilaa xog shakhsiyeedka sida waafaqsan sharciga iswidhishka. Marka xogtaada shakhsiyeed la diiwaangeliyo ama si kale loo isticmaalo, waxaad xaq u leedahay macluumaadka gaarka ah ee aan hadda kaa hayno adiga.

Folkhögskoleföreningka Angered ayaa mas'uul ka ah habeynta macluumaadkaaga shakhsiyeed. Waxaad marwalba la xidhiidhi kartaa Folkhögskoleföreningka Angered adiga oo nagala xidhiidhaya fnsk.ang@folkbildning.net. Inaad xubin ka noqoto folkhögskoleföreningku waa ikhtiyaari, waana sidoo kale gudbinta macluumaadkaaga shakhsiyeed, laakiin waxaan u baahanahay macluumaad gaar ah oo adiga kugu saabsan si xubinnimo aad nooga diiwaan gashanaato.

Xubin ahaan, macluumaadkaaga shakhsiyeed waa la kaydin doonaa loona isticmaali doonaa ujeedooyin gaar ah. Xogaha shakhsiyeed ee aan kaa haynaa waa magaca, personnummerka, cinwaanka iyo e-maylka. Macluumaadka shakhsiyeed ee lagaa qaaday waa mid sharci ah oo lagama maarmaan u ah fulinta shuruudaha xubnimada iyo in Folkhögskoleföreningku uu leeyahay daneyn sharci ah inuu awoodo in uu hirgeliyo xogta shakhsiyeed ee ujeedooyinka hoos ku xusan.

Isticmaalka xogta shakhsiyadeed ee u muuqan karta xasaasiga waxaa la qaadaa oo kaliya daruuri markay noqoto iyadoo sharcigu taagerayo. Ujeedada loo isticmaalo xogtaada shakhsiyeed waa in la ilaaliyo maareynta diiwaan wanaagsan, si loo maamulo xubnimada, si laguugu soo diro macluumaad iyo suuqgeyn. Waxa kale oo laga yaabaa in aanu xogtaada shakhsiyeed u eegno ujeedooyinka tirakoobka. Waxa personnummerka loo diiwaan geliyaa maadaama oo ay muhiim tahay in Folkhögskoleföreningka Angered uu hubiyo aqoonsigaaga. Macluumaadkaaga shakhsiyeed waxaa lagama maarmaan ah in lagu farsameeyo nidaamka IT-ga. Macluumaadkaaga shakhsiyeed waxaa sidoo kale loo gudbin karaa shirkadaha iyo ururrada kale ee aan ka wada shaqeyneyno markay lagama maarmaan u noqoto hawlaha ururka. Tusaale ahaan, waxaan u gudbin karnaa cinwaankaaga hay'adda AB Föreningshuset ee diiwaangelinta xubinnimada. Waxaan sidoo kale siin karnaa macluumaadkaaga shakhsiyeed si aad Postnord boostada laguugu soo diro. Marka macluumaadkaaga shakhsiyeed la isticmaalayo, waxaan tixgelineynaa ammaanka iyo asturnaanta.

Muddada kaydinta

Folkhögskoleföreningka Angered waxay hayaan macluumaadkaaga shakhsiyeed illaa inta aad xubin ka tahay. Labo sanadood ka dib markaad joojiso xubinnimadaada, macluumaadkaaga shakhsi ayaa la tirtiri doonaa. Folkhögskoleföreninka Angered ayaa sii hayn doona oo kaliya haddii waajibaad sharci ay noqoto.

Xuquuqdaada

Waxaad xaq u leedahay inaad fahanto sida macluumaadkaaga shakhsiyeed loo isticmaalo. Tani macnaheedu waa inaad codsan karto helitaanka macluumaadka qaarkood ee ku saabsan isticmaalka. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato in macluumaadka shakhsiyeed ee khaldan la beddelo, xadidaadda isticmaalka xad-dhaafka ah, isticmaalka aan sababta lahayn in la tirtiro, iyo codsashada in macluumaadka shakhsiyeed laga gudbiyo nidaamkayaga oo loo gudbiyo cid kale, wareejinta xogta.

Dalab kuwan kore ka mid ah waxa loo gudbin karaal fhs.k.ang@folkbildning.net. Waxa kale oo aad xaq u leedahay inaad kala xidhiidho Hay'adda Kormeerka/Macluumaadka Kormeeraha wixii cabashooyin ah haddii aadan ku qanacsaneyn habka isticmaalka xogta shakhsiyeed, laakiin waxaan rajeyneynaa, dabcan, inaad marka hore nagala soo xidhiidho su'aalaha iyo codsiyada ku saabsan dalabka isticmaalka xogta shakhsiyeed.

Adiga oo aqbalaya shuruucdeena iyo shuruudaha xubnimada xubin ahaan, waxaad xaqiijineysaa inaad heshay macluumaadkan ku saabsan habka isticmaalka xogta shakhsiyeed.

Nidaamkayaga Qarsoodiga wuxuu si faahfaahsan u sharxayaa sida iyo sababta aan u kaydino macluumaadkaaga shakhsiyeed iyo xuquuqda aad leedahay. Haddii aad rabto inaad wax dheeraad ah ka ogaato siyaasaddayada asturnaanta, halkan ayaad ka helaysaa: